

Somaliska




Quseeyso dhallinyarada da'dooda tahay 16 ilaa 20 sano:

# Dugsiga sare



*Skolverket*

# Sidaan buu yahay nidaamka dugsiyada iswiidhishka.



Wixi ka bilaawdo markuu canugaada buuxiyo hal sano, wuxuu kuu dhigankara dugsiga xannaanada. Ciyaarta aad muhiim u tahay markey noqoto dugsiga xannaanada. Markuu canuga buuxinaayo 6 sano, bey dhammaan carruurta bilaabikaran fasalka ardeyda lix sano jirka. Dugsiga xannaanada iyo fasalka ardeyda lix sano jirka waa arrin ah tabarruc.

Dhammaan carruurta waxey bilaabaan dugsiga aasaasiga markey gaaraan 7 sano, oo in ey dhigtaan

waa qasab. Sharciga oo waajibadka dugsiga wuxuu ardeyga qasab ku tahay fasalka 1 ilaa 9, oo waa sagaal sano.

Markaas kadib dhallinyarada waxey saddax sano dhigtan dugsiga sare. Dhammaan xaq bey u leeyihiin iney bilaabaan dugsiga ilaa sanadka ey buuxinaayaan 20 sano. Dugsiga sare ardeyga wuxu u diyaarin inuu dhigankaro waxbarasho jaamacadeed, ama toos shaqo u bilaabo.

# Dugsiga sare.

## Wuxu kuu diyaarin shaqo ama waxbarasho.

**Dugsiga sare oo iswiidhan** waa waxbarasho oo tabarruc ah. Ayadoo ey sidaas tahay dhammaan inta ugu badan ardeyda wey sii wataan waxbarashada dugsiga sare markey ka baxan dugsiga aasaasiga. Sidaas bey dhallinyarada iskugu sii diyaariyaan waxbarasho sare oo jaamacadeed ama in ey shaqo toos u bilaabikaran markey qaataan shaahadada dugsiga sare.

Waxbarashada dugsiga sare caadiyan waxa la dhigtaa saddax sano. Badanaa ardeyda waxey toos u bilaabaan markuu dugsiga aasaasiga ey dhammeyaan, oo markaas da'dooda tahay 16 sano. Waxbarashada dugsiga sare waa inuu ardeyga bilaabaa ugu dambeyn inta uusan gaarin 20 sano. Dadka oo intaas ka weeyn waxbarashada dugsiga sare waxey ka dhigan karan waxbarashada oo dugsiga sare oo dadka waaweyn lagu talagalay.

Dhallinyarad oo maskaxda curyaanka ka ah oo sidaas daraadeed ka soo bixikarin waxbarashada oo dugsiga sare, waxey dhigan karan dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman. Arrintaas waxa kasii aqrisan karta waraaqada warbixinta oo ku saabsan dugsiga sare oo ardeyada caqliga dhiman.

Dugsiga sare waxaa lagu dhigtaa lacag la'aan. Taasna micnaheeda waxey tahay in ardeyga lacag eysa ku bixineyn waxbarashada, boogaga iyo qalabka waxbarashada. Laakin dugsiyada sare waxey xaq u leeyihiin in cuntada dugsiga ey lacag ku qaataan. Dhammaan ardeyada oo dugsiga sare dhigtaan waxey xaq u leeyihiin lacagta kaalmada oo waxbarashada.



# 18 barnaamish oo dugsigga sare baa kaa rabtid ka dalbankarta

**Dugsigga sare wuxu** lee yahay sideed iyo toban barnaamish oo qarameed, oo kaa rabtid ka dalbankartid. Labo iyo toban waa barnaamishada oo shaqooyinka, oo taasna micnaheeda waxey tahay in ardeyga oo dhiganaayo waxbarasho shaqo oo dhameystiran, oo markuu qaato shahaadada qalinjebinta shaqo toos buu u bilaabikara. Lixda barnaamish oo kale adiga waxey kuu diyaarinaayaan inaa waxbarasho jaamacadeed dhigankartid.

Adiga oo dhigtay barnaamishyada oo waxbaras-

hada sare kuu diyaarinaayaan waxa si toos ah heli fursad aad waxbarasho u sii wadankartid. Waxbarashooyinka sare sida jaamacadaha camal waxey qaarkood rabaan inaa shahaado ardeyga ka haysto maadooyinka qaarkood. Sharuudaas noocaas waa kuwu loo yaqaan u qalmidka qaaska ah. Adiga oo dalbaday barnaamish barasho shaqo, waa inaa codsataa oo dhigataa koorsooyinka iswiidhishka iyo ingiriska oo markaas ku siinaayaan u qalmidka qaaska ah, sidaa waxbarasho sare u dhigankartid.

## 18 barnaamish oo dugsigga sare

### Barnaamishyada barashada shaqooyinka

- Barnaamishka dhismaha
- Barnaamishka carruurta iyo xilliga firaaqada
- Barnaamishka korontada iyo tamarta
- Barnaamishka gaadiidka iyo wax raridda
- Barnaamishka ganacsiga iyo maamulka
- Barnaamishka farsamo gacmeedka
- Barnaamishka hodheelka iyo dalxiiska
- Barnaamishka farsamaha warshadaha
- Barnaamishka dhowrista deegaanka
- Barnaamishka makhaayada iyo raashinka
- Barnaamishka VVS iyo guriga
- Barnaamishka xannaanada iyo daryeelka

### Barnaamishyada oo dugsigga sare oo kuu diyaarinaayaan waxbarasho jaamacadeed

- Barnaamishka fanniga leh
- Barnaamishka dhaqaalaha
- Barnaamishka adabka bi'aadimka
- Barnaamishka culuunta dabiiciga ah
- Barnaamishka cilmi barashada mushtamaca
- Barnaamishka farsamaha

Waxa xitaa jiro waxbarashooyin kale, tusaale ahaan waxbarashada isboortiga. Waxa xitaa jiro shan barnaamish oo la qansi ah oo loogu talagalay ardeyda aan heysan shahaado ey ku bilaabaan barnaamishyada qaranka midkood.

# Sharuudaha lagaa baro inaa fulisaa sidaa u bilaabikartid

**Sidaa dugsigga sare** u bilaabikartid waxa inaa fulisaa sharuudaha sida camal inaa dhowr shahaado ka haysatid maadooyinka lagu dhigto dugsigga aasaasiga.

Dhammaan barnaamishyada dugsigga sare waxey sharuudooda tahay inaa shahaado ka haysatid maa-dada iswiidhishka ama iswiidhishka labaad, ingiriska iyo xisaabta.

Barnaamishyada barashada shaqooyinka waxey kale u sii baahanjiihin inaa shahaado ka haysatid shan maado oo kale iyo barnaamishyada waxbarasho jaamacadeed kuu diyaarinaayaan sagaal maado oo kale waa inaa shahaado ka haysataa.

# Sidaan baa waxbarashada loo qorsheeyay

## Waxbarashada dugsiga sare dhowr qeyb buu ka koobanyahay.

- Maadooyinka qaarkood barnaamishada waa lagu wada dhigtaa. Maadooyinkaas waa ingiriska, taariqda, isboortiga iyo caafimaadka, xisaabta, cilmiga sayniska, diinta, cilmiga bulshada iyo iswiidhishka iyo iswiidhishka oo luqada labaad.
- Ardeyga wuxu dhigan dhowr maado oo markaas qaas u ah barnaamisha uu dalbaday. Barnaamishkasto wuxu lee yahay koorsooyin oo waxbarashada sii qaas ah loo sii dalbanaayo.

- Ardeyga waa inuu xitaa dalbadaa labo koorso oo kamid ah koorsooyinka qaaska. Waxa la dalbankara in la dhigto maadooyin oo ku siinaayo fursad aad waxbarasho jaamacadeed ku bilaabikartid markaa dugsiga sare kadib.

Adiga oo dhigto barnaamishka barashada shaqooyinka waxa waqtiga waxbarashada inta ugu badan ku qaadan dugsiga, laakin ilaa nus waqtiga waxbarashada waxa ku qaadankarta meeshada shaqada. Hadii aad dalbatid inaa waqtigaada inta ugu badan aad ku qaadatid meesha shaqada waxa lagu magacyeera shaqo shaqo-barashada.



## Shahaado iyo shahaadada qalinjibinta

### Shahaadooyinka waxey kala jihiin lix darajo:

A, B, C, D, E iyo F. A baa ah shahaadada ugu sareyso iyo E baa ah shahaadada tan ugu hooseyso oo ah waa ku baastay. Shahaadada F micnaheeda waxey tahay maadada ma aadan ku baasin. Adiga waxa lagu siin shahaado markey koorso kuu dhammaato.

Dugsiga waxaa u yaal shuruudo oo ku sabsan aqoonta laga rabo in ardeyga ugu yaran uu fuliyo. Dhammaan dugsiyada shuruudahaan weey ka wada siman jihiin. Shahaadooyinka lagu ma bixinaayo ayaa doo ardeyada kale oo fasalka waxa la siiyay la isla barbar dhigaayo, waxa kaliya la fiirinaayo waxa waaye sida uu ardeyga shuruudaha aqoonta koorsada uga soo baxay.

Macallinka baa kuu sheegayo shuruudaha oo darajada shahaadooyinka, markastoo la bilaabaayo koorso cusub. Hadii aad ardeyga tahay markasto macallinkaada waa kala hadlikarta meesha adiga natiijadaada ey waqtigaas la joogo ey ku dambeyso inta ey koorsada socoto. Markii shahaadadaada lagu siiyo kama dacwoonkartid.

Waxbarashada waxaa lagu dhameyn imtixam shaqo oo aad ku qalinjabisid. Adiga oo ardeyga ah waxa shaqadaas ku muujin aqoonti aad dhammaan baratay iyo inaa mas'uul aad shaqsiyan qaadikartid. Shaqaadas oo imtixamka waa inaa ku baastaa sidaa u helikartid shahaadada qalinjabinta.

# Dugsiga sare wuxu leeyahay xeerar muhiim ah

**Hadii aad ardeyga** tahay waxa xaq u leedahay in dugsiga caawinad qaaas ku siiyaan hadii aad ubaahantahay sidaa waxbarashada u dhameynkartid. Laakin dugsiga waxey toogtooda kaa sugaayaan inaa adiga inta awoodaada ah aad dadaadaashid.

Waxbarashada dugsiga sare waa arrin tabarruc ah. Laakin hadii aad adiga bilaawdid waa qasab inaa ka qeyb-qaadatid waxbarashada. Hadii aad jiratid waa inaa dugsiga la soo xiriirtaa. Ardey oo sabab la'aan

iska maqan, oo dugsiga la soo xiriirin, waxaa ka qasariikaro booskiisa iyo lacagta kaalmada waxbarashada.

Dugsiga wuxu lee yahay xeerar sidey waxbarashada u noqonkarto mid wanagsan. Dhammaan ardeyda waxey xaq u leeyihiin in ey helaan kalsooni iyo waxbarasho dagan. Macallinka wuxu xaq u leeyayahay inuu ardeyga fasalka dhib ku haayo inuu xisada ka saaro. Hadii ey xaalada tahay mid halis ah ardeyga waxaa la siin qoral oo dagniin ah.

## Dalbashada dugsiga

**Markaa rabtid inaa** dalbatid dugsi iyo barnaamish waxa la xiriirikarta shaqaalaha jideynta waxbarashada iyo shaqooyinka. Shaqaalahaas weey joogan dhammaan dugsiyada, waxa ka helee dugsiga aasaasiga iyo dugsiga sare. Ayada ama asag baa kaa caawinkaro waxbarashada iyo shaqada aad qorsheysan laheed.

Ardeyga wuu dalbankara dugsiga oo rabo, ha ahaado mid degmada ama degmada bannaankeeda. Laakinsa boosaska waa lagu tartami, oo ardeyga shahaadadiisa baa la fiirin. Degmada aad ku nooshahay waxey leedahay dugsiyo ey mas'uul ka yihiin, laakin weey jiraan xitaa dugsiyo oo shaqsi iska leeyahay. Dugsi shaqsi ah waxaa mas'uul ka ahaan karo shirkad, hey'aad samafal ama urur. Dhammaan dugsiyada waxaa lagu dhigtaa lacag la'aan, oo markey

noqoto aqoonta iyo shuruudaha aqoonta waa isku mid. Adiga waxa xaq u leedahay lacagta kaalmada waxbarashada, dugsiga sare oo kasto uu dalbado. Qofkii rabo inuu dugsi degmo kale ka dhigto ama dugsi ey shirkad iska leedahay waa inuu codsi u dir-sadaa degmada uu ku noolyahay.

Dugsiga sare waxa la soo codsadaa dayrta uu ardeyga dhiganaayo fasalka sagaalad. Jawaab ku sii meel gaar ah baa loo soo diri ardeyga guga, laakin jawaabta oo ugu dambeynta ah waxa loo soo diri xagaaga. Waa shahaadada oo ugu dambeyn ardeyga la siinaayo guga, waxa go'aaminaayo hadii ardeyga uu boos ka heley dugsi iyo barnaamishkii uu dalbaday. Sidaas daraadeed bey muhim u tahay in dhowr dugsi iyo barnaamish oo kala duwan dalbatid.



# Ardeyga baa waxbarashadiisa mas'uul ka ah iyo go'aaminaayo

**Dhammaan ardeyada dugsiga sare** waa ey ka qeyb-qaadan karan go'minta waxbarashadooda, iyo mas'uuliyada waxbarashadooda. Dugsiga wuxu ku dhisanyahay dimuqraadiga sida nolosha bulshada wadanka. Aad eby muhim u tahay in dugsiga shaqadiisa ku wada si dimuqraadig ah.

Ugu yaran lixdii bilood hal mar waa in ardeyga la kulmaa macallinkiisa oo laga wada hadlaa waxbarashada ardeyga. Waa kulanka wada hadalka horumarinta waxbarashada ardeyga. Qiimo weey bey leedahay hadii waalidka ardeyga markaasna ey ka soo qeyb-gali karaan. Adiga oo ardeyga ah waxaa heli

fursad oo dugsiga sida uu yahay uga hadlikartid iyo hadii uu ku faraxsanyahay. Ardeyga wuxu heli fursad uu mas'uul uga noqdo waxbarashadiisa. Ardeykasto wuxu leeyahay qorsho waxbarashada oo qaas u ah. Wada hadalka waxbarashada baa loo wada xaajoon qorshahaas natiijadiisi.

Hadii aadan 18 sano buuxin waalidkaada xaq bey u leeyihin in ey ka qeyb-qaataan kulanka wada hadalka horumarinta waxbarashada ardeyga. Ardeyada oo 18 sano buuxiyeen ayaga baa go'aaminaayo hadii ey rabaan in waalidka ey ka qeyb-qaataan ama hadii eysan rabin.



## Waxbarashada luqada hooyo iyo caawinada qaaska ah

**Hadii luqadaada hooyo** eysa eheen iswiidhishka iyo luqadaas aad gurigiina uga hadashiin, wuxu ardeyga xaq u leeyahay waxbarashada luqada hooyo. Sharuuda baa waxey tahay inaa adiga ku hadli kartid luqadaada hooyo iyo in la helo koox ardey oo gaareyso ugu yaran 5 ardey iyo macallin habboon.

Adiga waxa xaq u leedahay in waxbarashadaada laguugu sharaxo luqadaada hooyo hadii aad ubaahantahay.

Ardeyga hadii oo haysan shahaadooyinka inta laga rabo siduu u soo codsado dugsiga sare, wuxu bilaabikara barnaamisha bilaawga. Tusaale ahaan

waxa jiro barnaamish oo luqada lagu barto oo qaas ahaan loogu talagalay ardeyda wadanka Iswiidhan ku cusub oo ubaahan in ey luqada iswiidhishka sifiican u bartaan.

Ardey oo dhigto barnaamishyada qaranka midkood oo dugsiga sare, oo markaas halis ku jiro inuu waxbarashada shahaado ka helidoonin wuxu xaq u leeyahay inuu caawinaad qaas ah la siiyo. Ardeyga, waalidka, macallinka iyo maamulaha dugsiga baa wada kulmaayaan, oo waxey ka wada heshiinaayaan sida ardeyga loo caawini lahaa, waxa dugsiga uu suubin karo iyo waxa uu ardeyga suubinkaro.

**Beställningsuppgifter:**

Fritzes kundservice

106 47 Stockholm

**Telefon:** 08-690 95 76

**Telefax:** 08-690 95 50

**E-post:** skolverket@fritzes.se

**Beställningsnr:** 13:1380

**Bilder:** Johnér, Hans Alm, Bildarkivet.se,

Michael McLain

**Illustratör:** Helena Halvarsson

**Grafisk produktion:** Jupiter Reklam

**Tryck:** Åtta45

*Skolverket*

skolverket.se/nyanlanda